**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 15aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 01/02/2026* |


## XEERKA RAHANKA BANGIYADA IYO HAY'ADDAHA MAALIYADEED
## XEER LR. 110/2025


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**



*Sannadka 2026*


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

جمهورية صوماليلاند

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT
مكتب الرئيس

Tix: JSL/XM/WM/222-216/012026

Taariikh: 13/01/2026

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Rahanka Bangiyada iyo Hay'adaha Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 110/2025.**

**Markii aan arkay:** Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markii aan arkay:** Qoddobka 38aad faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markii aan arkay:** Qoddobada 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jahhuuriyadda Somaliland.

**Markii aan helay:** Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiilada **(Go'aan Lr.GW/KF-13/29/2025)** ee summadiisu tahay **Ref:/531/2025** ee ku taariikhaysan 23/12/2025.

**Waxa aan Soo-saaray;**

Wareegtadan lagu faafinayo dhaqan-galka Xeerka Rahanka Bangiyada iyo Hay'adaha Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland **Xeer Lr. 110/2025.**

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**Ujeedo: - Xeerka Rahanka Bangiyada Iyo Hay'addaha Maaliyadeed ee Somaliland Xeer Lr. 110/2025**

# GOLAHA WAKIILLADU

**MARKUU ARKAY: -** Qodobka 11aad, 13aad, 55aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**MARKUU ARKAY: -** Waajibaadka Dastuuriga ah ee ka saaran Golaha Wakiillada ansixinta xeerarka lagu nidaaminayo maalgelinta bangiyada, rahanka hantida guurtada ah iyo ma'guurtada, waajibaadka deyn bixiyaha iyo deyn qaataha, si'waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

**MARKUU YAQIINSADAY: -** Mabaadii'da iyo qaabdhismeedka guud ee Bangiga Dhexe ee JSL iyo xeerka Bangiga Dhexe ku waajibiyay, inuu diiwaangaliyo Bangiga Dhexe, isla markaana hago hay'adaha maaliyadeed ee ka shaqeeya Somaliland.

**MARKUU ARKAY: -** Soojeedinta xukuumadda ee Xeerkan Rahanka Bangiyada oo lagu maamulayo bixinta deymaha ee bangiyada iyo hay'adaha maaliyadeed, si'waafaqsan Dastuurka JSL.

**MARKUU DHAGEYSTAY:** Warbixinta lifaaqa Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha iyo Soojeedinta Guddida Shareecada ee waafaqsanaanta Shareecada Islaamka ee xeerka iyo doodda mudanayaasha Golaha.

RECEIVED
23 DEC 2025
BY PRESIDENCY:
Reg No: 1133/25

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY: -** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:110/2025** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **27/09/2025** |
| **MARKUU ARKAY: -** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:110/2025** ee Golaha Guurtidu u soo Gudbiyeen Golaha wakiilada JSL kuna Taariikhsanayd **23/12/2025.** |
| **MARKUU ARKAY: -** | In Golaha Guurtidu wax-ka-bedel iyo kaabis aanu ku samayn kuna ansaxiyeen sidii golaha wakiilladu ugu gudbiyeen **Xeerka Rahanka Bangiyada Iyo Hay'addaha Maaliyadeed ee Somaliland Xeer Lr. 110/2025** |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(31 cod)** oo gacan tag ah ku Ansaxiyay Xeerka Rahanka Bangiyada iyo Hay'addaha Maaliyadeed ee Somaliland Xeer **Lr. 110/2025, Gudoomiyuhuma muu Codayn** Sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Siciid Mire Faarax (Giire)** |
| Xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada JSL | G/X ahna K/S Gud. Golaha Wakiilada JSL |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA ARKIIFIYADA
MADAXTOOYADA

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADU

**MARKUU ARKAY: -** Qodobka $11^{aad}$, $13^{aad}$, $55^{aad}$, $77^{aad}$ iyo $78^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**MARKUU ARKAY: -** Waajibaadka Dastuuriga ah ee ka saaran Golaha Wakiillada ansixinta xeerarka lagu nidaaminayo maalgelinta bangiyada, rahanka hantida guurtada ah iyo ma'guurtada, waajibaadka deyn bixiyaha iyo deyn qaataha, si'waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

**MARKUU YAQIINSADAY: -** Mabaadii'da iyo qaabdhismeedka guud ee Bangiga Dhexe ee JSL iyo xeerka Bangiga Dhexe ku waajibiyay, inuu diiwaangaliyo Bangiga Dhexe, isla markaana hago hay'adaha maaliyadeed ee ka shaqeeya Somaliland.

**MARKUU ARKAY: -** Soojeedinta xukuumadda ee Xeerkan Rahanka Bangiyada oo lagu maamulayo bixinta deymaha ee bangiyada iyo hay'adaha maaliyadeed, si'waafaqsan Dastuurka JSL.

**MARKUU DHAGEYSTAY:** Warbixinta lifaaqa Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha iyo Soojeedinta Guddida Shareecada ee waafaqsanaanta Shareecada Islaamka ee xeerka iyo doodda mudanayaasha Golaha.

**Wuxuu Ansixiyay**

**Xeerka Rahanka Bangiyada iyo Hay'addaha Maaliyadeed ee Somaliland Xeer.Lr.110/2025**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# CUTUBKA 1AAD
# QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka

**Xeerkan waxa loogu yeedhaya Xeerka Rahanka Bangiyada iyo Hay'addaha Maaliyadeed Xeer L.r 110/2025.**

## Qodobka 2aad
## Erey-bixin

**Baanka Dhexe:** Waxa loola jeedaa Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland;

**Baan:** Waxa loola jeedaa baan kasta oo dhigaal ka qabata dadweynaha, bixiyana amaah ama maalgelin, ruqsadna ka haysta Baanka Dhexe ee JSL.

**Hay'ado Maaliyadeed:-** Waxa loola jeedaa hay'ad ama shirkad bixisa adeegyo la xidhiidha lacag, maalgashi iyo adeegyo dhaqaale oo kale sida bangiyada, xawaaladaha, shirkadaha caymiska iyo adeegyada lacagta (application-da lacagta)

**Deynsane:** Waxa loola jeedaa qof ama shirkad leh shakhsiyad qaanuuneed oo uu deyn-bixiyuhu u sameeyey maalgelin ama uu deynsiiyay.

**Deyn-bixiye:** Waxa loola jeedaa baananka bixiya deymaha lagu rahmo hantida ma'guurtada ah ee ruqsadda ka haysta Baanka Dhexe JSL.

**Rahmid:** Waxa loola jeedaa heshiis rahan oo u dhexeeya baan deynbixiye ah iyo deynsanaha, kaas oo deynbixiyuhu ka hayo deysanaha hanti ma'guurto ah, si uu ugu kalsoonaado soo celinta deynta la siiyay, ugana goosto qiimaheeda, haddii la bixin waayo deynta.

**Diiwaangelin:-** Waxa loola jeedaa diiwaangelinta heshiiska rahanka ee ay samayso Maxkamadda Rafcaanka JSL.

**Waraaqaha lahaanshaha:-** Waxa loola jeedaa qoraallada caddaymaha lahaanshaha hantida ma'guurtada ah ee la rahmayo ee ay soo saaraan dawladaha hoose ee

degmada ay hantidu ku taallo.

**Caddaynta Mulkiyadda:-** Waxa loola jeedaa lahaanshaha sharci ee hantida oo ka soo baxday xafiis dawladeed oo awood u leh.

**Bixin la'aanta deynta:** Waa marka uu deynsanuhu bixin waayo deyntii ay ahayd in uu u celiyo mudadi lugu heshiiyey deynbixiyaha.

**Deynta:** Waxa loola jeedaa qaddar lacag ah oo deynbixiyuhu amaahiyay deynsanaha, si waafaqsan axkaamta Shareecada Islaamka.

**Xaraash:-** Waxa loola jeedaa iibinta hantidii rahmanayd, si uu deynbixiyuhu u helo deyntii ka maqnayd ee uu deynsanuhu ku bixin waayay muddadii lagu heshiiyay.

**Maxkamadda Gobolka:-** Waxa loola jeedaa Maxkamadda Gobolka ee awoodda u leh xaraashka hantida rahman.

**Xisaabta amaahda:** Waa xisaab deynbixiyuhu u furo deynsanaha, si uu ugu bixiyo deynta.

**Sukuuk:-** waxa loola jeedaa shahaadooyinka maaliyadeed ee waafaqsan nidaamka bangiyada islaamiga ah oo la mid ah lacagta caadiga ah.

**Rahan:-** Waxa loola jeedaa cayn maaliyadeed oo loo dhigay dammaanad.

**Heshiiska Rahanka:** Waxa loola jeedaa heshiis qoraal ah oo ay saxeexeen deynsanaha iyo deynbixiyuhu, kaas oo qeexaya hantida la rahmay.

**Hantida Rahman** Waxa loola jeedaa hantida ma'guurtada iyo guurtada ah ee deynsanuhu u rahmay si uu u helo maalgalin ama deyn.

**Deynta taagan: -** Waa deynta wakhtigii la bixin lahaa gaadhay ee aan la bixin

**Dib u muddeyn** Waa marka deynbixiyuhu u kordhiyo deynsanaha muddada uu deynta ku bixinayo.

**Sicirka xaraashka:** Waa qiimaha suuqa ee hantida la iibinayo ama inta loo dhaafi waayo hadii hab naado ah lagu iibinayo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Masiibo dabiici ah:** Waxa loola jeedaa masiibo dabiici ah oo ka baxsan awoodda qofka (force majure) sida daadadka, duufaannada, dhulgariirka, dabka IWM.

**Qodobka 3aad**
**Ujeeddooyinka Xeerka**

Ujeeddooyinka xeerkan loo sameeyay waa;-

1. In la helo xeer waafaqsan shareecada islaamka oo loo raaco arrimaha rahanka iyo xaraashka.
2. In la helo xeer lagu maamulo arrimaha la xidhiidha rahanka hantida ma'guurtada & guurtada ah ee baananka, sidoo kalana loo sugo xuquuqaha iyo waajibaadyada dhinacyada heshiiska rahanka.
3. In la helo xeer lagu sugo kalsoonida deynbixiyaha iyo deynsanaha iyada oo loo marayo rahanka hantida ma'guurtada & guurtada ah.
4. In lagu qeexo shuruudaha heshiisyada rahanka iyo hannaanka xaraashka hantida rahanka, si loo ilaaliyo xuquuqaha deynbixiyaha iyo deynsanaha.
5. In la fududeeyo adeegyada ganacsiga iyo deynbixinta ee bangiyada, si ay uga qayb qaataan soo jiidashada maalgashiga iyo kor u qaadidda kobaca dhaqaalaha.

**Qodoka 4aa**
**Xadka Dabbaqidda Xeerka**

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa nidaamka rahanka hantida ma'guurtada ah iyo guurtada iyo hannaanka loo xaraashayo hantida rahman ee loo rahmo bangiyada iyo hay'adaha maalyadeed ee ruqsadda ka haysta Baanka dhexe ee JSL.

## CUTUBKA 2AAD
## SHURUUDAHA DHISMAHA RAHANKA

**Qodobka 5aad**
**Waajibaadka Baanka dhexe ee JSL**

1. Baanka dhexe ee JSL oo ah ha'yad dastuuri ah oo ku aasaasan Xeer 54/2012 waxa uu soo saari doona hagayaal korjoogtayneed oo lagula soconoyo nidaamka deyn bixineed ee bangiyada gaarka ahi bixinayaan.
2. Waxa kale oo uu dadweynaha JSL siin doonaa talooyin lacag la'aan ah iyo tilmaamo, si looga ilaaliyo in qofku iska qaato deyn xad dhaaf ah, hadhawna khatar ku noqon karta inaanu soo celin ama bixin karin.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Sannad walaba waxa uu soo saari doonaa warbixin sannadeedyo lagu lafagurayo dhaqan deyn bixineedka muwaddiniinta ee dalka, iyagoo kaashanaya guddida shareecada ee bangigga, si loo xaqiijiyo anshaxa suubban ee deyn bixinta iyo midaynta nidaamyada deyn bixinta (standardisation).

4. Baanka Dhexe ee JSL wuxuu samaynayaa hab toos ah (online) oo lagu keydiyo dhammaan macluumaadka iyo hantiyaha u rahman bangiyada gaarka loo leeyahay, si looga hortago in hal hanti lagu rahmo bangiyo kala duwan.

## Qodobka 6[aad]
## Dhismaha Rahanka

**1.** Qof kasta oo leh hanti ma'guurto ama guurto ah waxa uu hantidiisa deyn kaga qaadan karaa baananka dalka lacag ama maalgelin, isagoo ku rahmaya hantidiisa gebi ahaan ama qayb ahaan, si uu u sugo soo celinta deynta uu qaatay, taas oo haddii uu bixin waayo deynta looga (xaraashayo) hantida rahman, si waafaqsan shuruudaha xeerkan.
**2.** Baananka iyo hay'addaha maalyadeed ee ka diiwaangashan JSL waxay bixin karaan deyn hab lacageed ama hab maalgelin ah iyaga oo rahan ahaan u haysanaya hanti ma'guurto ah ama (guurto ah) si ay hantidaasi ugu noqoto dammaanad una helaan kalsoonida, in loo soo celinayo deynta ay bixiyeen ama la xaraasho) hantidaas haddii la bixin waayo deynta.
**3.** Rahanka hantidu waxay u dhaqan galaysaa oo u shaqaynaysaa oo kaliya xuquuq dammaanadeed oo la xidhiidha deynta deynsanaha uu deyn bixiyuhu ku leeyahay;

## Qodobka 7[aad]
## Shuruudaha Dhismaha Rahanka

Shuruudaha tiirarka rahanka hantida ma'guurtada ah ama guurtada ahi:

1. Waa in hantida la rahmayaa ay ka madax bannaan tahay sheegasho cid kale sida dhaxal, xayiraad ama dacwadi ku socoto.

2. Waa in hantida la rahmayaa ay tahay hanti ma'guurto ama guurto ah, taas oo la wareejin karo ama la iibin karo.

3. Waa inay labada dhinac galaan heshiiska rahanka, kaas oo lagu faahfaahinayo macluumadka hantida la rahmayo iyo deynta la bixinaayo.

4. Waa in dayn bixiyuhu ahaado baan ama hay'ad maaliyadeed oo ka diiwangashan dalka, isla markaana ruqsad ka haysta Baanka Dhexe ee JSL.

5. Waa in deyn qaatuhu ahaado mulkiilaha dhabta ah ee hantida ama wakaalad u ogolaanaysa tasarrufka hantidaas ka haysta mulkiilaha, hasystaana Mulkiyadda lahaanshaha hantida la rahmayo oo sax ah.

6. Waa in dayn qaatuhu u gudbiyaa deyn bixiyaha mulkiyadda hantida la rahmayo oo sax ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL * FAAFINTA RASMIGA AH * OFFICIAL GAZETTE * SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 8aad
## Shuruudaha Heshiiska Rahanka

Heshiiska rahanka ee ay dhinacyadu wada galayaan waxa waajib ah inuu yeesho qodobbadan: -

1. Waa in heshiiska rahanku yahay qoraal saxeexan oo ka soo baxay xafiis nootaayo oo ka diiwaangashan wasaaradda caddaaladda.
2. Waa in heshiiska lagu xusaa magaca deyn-bixiyaha, tirsiga ruqsaddiisa, halka uu ka diiwangashan yahay cinwaankiisa iyo cidda wakiilka ka ah.
3. Waa in heshiiska lagu xusaa magaca deyn-qaataha oo buuxa cinwaankiisa iyo aqoonsigiisa.
4. Waa in heshiiska lagu xusaa faahfahinta macluumaadka hantida la rahmayo sida: nooca hantida, goobta ay ku taallo, tirsiga diiwaanka ee dawladda hoose, jihooyinkeeda ama caddaynta mulkiyadda lahaanshaha hantida la rahmayo.
5. Waa in heshiiska lagu xusaa lacagta deynta ah, nidaamka deyn bixinta iyo wakhtiyada la bixinaayo.
6. Heshiiska rahanka waa waajib in laga diiwangaliyo Maxkamada Racfaanka ee Gobolka heshiisku ka dhacay ku taalla.

## Qodobka 9aad
## Tilmaamaha deyn bixiyaha iyo deynsanaha

1. Deyn bixiyuhu waa in uu ahaadaa Bangi ama hay'ad maaliyadeed oo ka diiwaaangashan Jamhuuriyadda Somaliland, ruqsadna ka haysta Baanka Dhexe ee JSL.
2. Deynsanuhu waa in uu noqdaa qof ama shirkad leh shaksiyad qaanuuni ah oo la amaahiyey lacag ama loo sameeyay maalgelin si'waafaqsan xeerkan iyo shareecada islaamka.

## Qodobka 10aad
## Xuquuqaha iyo Waajibaadka Deynsanaha

1. Deynsanuhu waa ku waajib in uu ka ilaaliyo hantida rahman wax kasta oo qiimaheeda hoos u dhigaya inta ay rahman tahay ama deynta uu bixinaayo.
2. Deysanuhu waxa uu xaq u leeyahay dheef kasta oo ay leedahay hantida rahmani, isaga ayaana maamulaya, haddii aan si ka duwan lagu heshiin.
3. Deynsanaha waxa ka reebban iibinta, hibeynta ama wareejinta hantida rahman, haddii aanu oggolaansho qoraal ah ka haysan deynbixiyaha.
4. Deynsanuhu isagaa masuul ka ah bixinta cashuuraha iyo takaaliifta kale ee ku waajibay hantidiisa rahman.
5. Deynsanuhu marka uu oggolaansho ka helo deyn-bixiyaha, waxa uu:

   b. Dhisi karaa, dumin karaa ama dayactir ku samayn karaa dhisme ama dhul ka mid ah hantida rahman.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

t. Hagaajin karaa dhulka laftiisa, taas oo aan waxba u dhimayn qiimihii dhulka.

j. U isticmaali karaa hawlo ganacsi ama kirayn karaa.

6. Deynsanaha waa laga dhaxli karaa hantida rahman, heshiis kasta oo xakamaynaya xaqa dhaxalkuna waa waxba kama jiraan, waxaana ku waajib ah dhaxlayaasha inay ka bixiyaan deynta hantida uu ka tagay deynsanuhu, si waafaqsan shareecada islaamka.

7. Haddii deyn bixiyuhu uu hayo hantida rahman waa in loo celiyaa deysanaha, kaddib marka uu bixiyo deynta, haddii uu dhintay deynsanuhu waxa uu u celinayaa deynbixiyuhu hantidii rahmanayd dhaxlayaasha deynsanaha, kaddib marka ay soo caddayso maxkamadda degmadu.

## Qodobka 11aad
## Xuquuqaha iyo Waajibaadka Deynbixiyaha

1. Deynbixiyaha waxa ku waajib ah:

   b) Inuu Ilaaliyo xogta iyo waraaqaha lahaanshaha hantida rahman ee deynqaataha.

   t) Inuu siiyo lacagta deynta marka uu deynqaatuhu soo codsado, si waafaqsan heshiiska rahanka.

2. Deynbixiyuhu waxa uu xaq u leeyahay:

   b) Inuu hubiyo saxsanaanta waraaqaha lahaanshaha hantida deynqaataha.

   t) Inuu kormeeri karo hantida u rahman waqtiyada shaqada.

   j) Inuu ka dalbado deynsanaha bixinta deynta, marka ay gaadho waqtigii soo celinta deynta, si waafaqsan heshiiska rahanka.

   x) Inuu maxkamadda gobolka ee awoodda u leh ka dalbado xaraashka hantida rahman, haddii deynqaatuhu uu ku guuldarraysto inuu bixiyo denta, kaddib marka uu deyn bixiyuhu siiyay waqtigii ogaysiinta ee bixinta deynta.

## Qodobka 12aad
## Waajibka Diiwangalinta Heshiiska Rahanka

Maxkamadda Rafcaanka ee gobolka ay ku taallo hantida la rahmay ayaa awood u leh in laga diiwaangaliyo heshiiska rahanka.

1. Deynqaatuhu waxa uu Maxkamadda Racfaanka u qoranayaa arji uu ku dalbanayo in heshiiska rahanka loo diiwaangaliyo.

2. Diiwangalinta heshiiska rahanka ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxay maxkamaddu ku diiwangalinaysaa diiwanka guud ee rahanka, waxaanay ku dhufanaysaa shaambad u gaar ah diiwan galinta rahanka oo ay ku qoran tahay (Diiwangalin) waxay maxkamadu siinaysaa rahan kasta oo ka diiwangashan tirsi u gaar ah iyo xilliga la diiwangaliyay.

3. Waxa kale oo maxkamadda laga diiwangalinayaa isbeddel kasta oo ku dhaca heshiiska rahanka

4. Arjiga rahanka waxa lagu lifaaqayaa nuqulka asalka ah ee heshiiska rahanka dhinacyadu ay wada galeen



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA 3AAD
## FULINTA IYO XARAASHKA HANTIDA RAHMAN

### Qodobka 13aad
### Dacwadaha Fulinta ah

1. Loofuliyuhu waxa uu ka furanayaa dacwad fulin ah Maxkamadda Gobolka, isagoo ku soo lifaaqaya dacwaddiisa heshiiska rahanka ah ee ka diiwaangashan Maxkamadda Rafcaanka.
2. Maxkamadda Gobolku waxay soo saaraysaa digniin fulineed oo 10 cicho ah, si'waafaqsan Xeerka Habka Madaniga.
3. Lagufuliyuhu marka uu qaato digniinta fulinta ayay uga bilaabmaysaa muddada digniintu.
4. Haddii uu ku guuldarraysto lagufuliyuhu inuu muddada digniinta ku soo bixiyo deynta oo dhammaystiran ama uu ku keeni waayo is hortaag fulineed, si'waafqsan Xeerka Habka Madaniga iyo xeerkan, Maxkamadda Gobolku waxay bilaabaysaa fadhiyada xaraashka, si loo xaraasho hantida rahman.

### Qodobka 14aad
### Fadhiyada Xaraashka.

1. Garsooraha soo saaray qaraarka digniinta fulintu waxa uu soo saaraya ogaysiiska xaraashka oo lagu daabacayo warbaahinta Qaranka muddo 10 maalmood ah.
2. Ogaysiiska ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waa in ay ku jiraan:
   b. Faahfaahinta xogta hantida la xaraashayo.
   t. Saacadda, maalinta iyo goobta xaraashka hantidu ka dhacayso.
3. Maxkamaddu waxay u diraysaa khabiir/khabiiro soo qiimeeya hantida la xaraashayo qiimaha suuqa ay ka marayso.
4. Haddii Maxkamadda Gobolka ee awooda u leh ay magacawdo hal qiimeeye wax ka badan oo ay jaangooyaan qiimayaal kala duwan, maxkamadda ayaa gaadhaysa go'aanka ugu danbeeya, qiimaha ay go'aamiso ayaana la qaadanayaa.
5. Maxkamaddu waxay furaysa fadhiyada xaraashka baahinta kaddib, waxaana ka soo qayb galaya fadhiyadaas daneeyayaasha soo ajiiba fadhiyada xaraashka.
6. Fadhiyada xaraashku kama badnaan karaan 2 fadhi oo noqonaaya:
   b. Fadhiga 1aad ee naadada xaraashka waxa uu ku bilaabmayaa qiimaha ugu sarreeya suuqa.
   t. Fadhiga 2aad waxa uu ku dhammaanayaa qiimaha ugu sarreeya naadada xaraashka ee fadhigaas loo gaadho.
7. Fadhiyada xaraashka waa la joojin kara haddii lagufuliyuhu bixiyo deyntii lagu lahaa.
8. Go'aanka xaraashku waa kama dambays.

### Qodobka 15aad.
### Qaybinta lacagta Hantida La xaraashay

Lacagta hantida la xaraashay waxa loo qaybinaya sidan.

1. Waxa dayn-bixiyaha loo celinaya lacagta dayntii uu ku lahaa daynsanaha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL * FAAFINTA RASMIGA AH * OFFICIAL GAZETTE * SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Baaqiga soo hadhana waxa loo celinaya dayn-bixiyaha ama dhaxlayaashiisa.

3. Haddii qiimaha xaraashku gudiwaayo deyntii lagu lahaa lagufuliyaha, loofuliyuhu wuxuu ku leeyahay qiimaha soo hadhay lagufuliyaha.

**Qodobka 16aad**
**Xaraashka Hantida kaddib**

1. Iibinta hantida rahmani waxay meesha ka saaraysaa heshiiskii rahanka ee u dhexeeyey dhinacyada.

2. Qofka kiro ahaan ugu jiray ama adeegsanayey hantida la xaraashay waa uu ku sii jirayaa ama sii adeegsanayaa inta uu heshiiskii kiradu dhammaanayo, lagumana qasbi karo in uu banneeyo ama wareejiyo hantida, kiradu marka la xaraasho waxay ku wareegaysaa mulkiilaha cusub.

3. Haddii deynsanuhu deynta ku bixin kari waayo muddadeedii marka ay gaadho, waxa uu ku wargalin karaa Maxkamadda Gobolka in la xaraasho hantida rahman (Declaration of bankruptcy).

4. Waxa kale oo uu xaq u leeyahay inuu deynbixiyihii ay hantidu u rahmanayd ka iibiyo hantidiisa amaba cid kale, si uu ugu bixiyo deynta lagu leeyahay.

## CUTUBKA 4AAD
## BIXINTA LA'AANTA DEYMAHA

**Qodobka 17aad**
**Ogaysiiska Bixin La'aanta Deynta iyo Xuquuqda Magdhowga**

1. Deynsanuhu marka uu bixin waayo hal hafto muddo 90 maalmood ah oo is xiga, waxa loo aqoonsanayaa bixinwaa.

2. Haddii deynsanuhu ku bixin waayo deynta muddadeedu gaadhay ee ku xusan faqaradda 1aad ee qodobkan heshiiska rahanka, deynbixiyuhu waa inuu u diraa qoraal uu kaga dalbanaayo inuu deynta ku soo bixiyo muddo 60 maalmood ah gudahood ah.

3. Haddii deysanuhu muddada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan ku bixin waayo deynta, deynbixiyuhu waxa uu qaadi karaa tallaabooyinkan soo socda:
   b) Waxa uu dacwad u gudbin karaa maxkamadda gobolka ee awoodda u leh, isaga oo ka dalbanaya in loo xaraasho hantida rahman.
   t) Waxa uu maxkamadda gobolka ka codsan karaa in lagu soo wareejiyo kirada hantida rahman, haddii ay kiraysantahay.

4. Lacagta kirada ee ku xusan faqradda 3aad xubintiisa (b) ee qodobkan waxa lagu bixinayaa deyntii uu deynbixiyuhu ku lahaa deynsanaha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 18aad
## Wadaxaajoodka Deynsanaha iyo Deynbixiyaha

1. Deynbixiyaha iyo deynsanuhu waxay ka wada xaajoon karaan in gebi ahaan hantida rahman uu la wareego deynbixiyuhu, taas oo u dhiganta dhammaan ama qayb ka mid ah deynta.

2. Deynbixiyuhu xaq uma laha in uu la wareego hantida rahman, isaga oo aan oggolaansho ka haysan deynsanaha.

3. Haddii deynbixiyuhu uu hantida kula wareego si'waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan waa inuu heshiis ka bixista ogeysiiyaa Maxkamada Rafcaanka.

4. Wadaxaajoodka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa la samayn karaa oo keliya haddii daynsanahu bixin kari waayo deynta, marka ay muddadeedii dhammaato.

# CUTUBKA 5AAD
# QODOBBO QUBANE AH

## Qodobka 19aad
## Masiibooyinka dabeeciga ah

1. Haddii ay masiibo dabiici ahi dhacdo sida dab, daadad ama masiibo kale oo dabiici ah, taas oo baabi'isay dhammaan ama qayb hantidii rahmanayd, waa in deynsanuhu uu wargelin qoraal ah u diraa deynbixiyaha, isaga oo ku faahfaahinaya masiibada iyo saamaynta deynbixinta ay ku yeelan karto. Deynsanuhu waa in uu sii wadaa deynbixintiisa masiibada kaddib.
2. Hantida rahman haddii ay u baaba'do si waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkan, deynsanuhu wuxuu keenayaa rahan cusub oo dib loo diiwaangaliyo haddii uu leeyahay hanitiyo kale ama damiinumaal.

## Qodobka 20aad
## Hagayaal iyo xeernidaamiyayaal

Baanka dhexe ee dawladdu waxa uu soo saarayaa hagayaal iyo xeernidaamiyayaal lagu fulinayo xeerkan, waxaana reebban in xeernidaamiyayaashu khilaafsanadaan mabaadii'da xeerkan oo waafaqsan halbeegayda caalamiga ah ee {(Accounting and Auditing Organization for Islamic Financial Institutions (AAOIFI)} ee shareecada iyo maamulka hay'adaha maaliyadeed.

## Qodobka 21aad
## Laalis

Xeerkani waxa uu laalayaa xeerarka iyo hagayaasha khilaafaya xeerkan gaarka ah ee rahanka bangiyada iyada oo aan waxba loo dhimayn qodobbada ku jira Xeerka Madaniga ee tilmaamaya rahanka iyo xaraashka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Qodobka 22aad**
**Xaaladaha kala Guurka**

Heshiisyadii rahanka ee hore u jiray dhinacyaduna ay wada galeen waxba uma dhimayo xeerkan cusubi, waana heshiisyo leh ku dhaqan qaanuun oo sii jiraya.

**Qodobka 23aad**
**Dhaqangalka Xeerkan**

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka labada gole ee xeerdejintu (Golaha Wakiillada iyo Guurtidu) ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saa saaro.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL**

____________________

**Siciid Mire Faarax (Giire)**
**G/X ahna K/S Gud. Golaha Wakiillada JSL**

____________________



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE